




# caafimaadkaaga mustaqbalkaaga

**Soo mar baaritaanka xubinta taranka dumarka**

Somali | af Soomaali




## Waa maxay afka ilmo-galeenka?

Afka ilmo galeenku waa qayb ka mid ah nidaamka taranka. Waxay ku taal dusha sare ee xubinta taranka haweenka waxayna isku xirtaa siilka iyo minka (ilmo galeenka).

## Waa maxay HPV?

Fayraska 'papillomavirus' (HPV) waa fayras caadi ah oo qofba qof ugu gudbiyo xiriirka galmada, oo ay kujirto taabashada galmada ee istaabashada labada maqaar HPV waa sababta ugu weyn ee keenta kansarka xubinta taranka dumarka.

## Waa maxay kansarka makaanka afkiisa?

Kansarka makaanka afkiisa waa cudur halis ah. **Marxaladaha hore, ma jiri karaan calaamado lagu garto.** Tijaabada baaritaanka xubinta taranka dumarka waxaa lagu heli karaa kansarka xubinta taranka dumarka ka hor intaan astaamo la arkin.

**Tijaabadu waxay noqon kartaa nolol badbaadin.**

## Waa maxay baaritaanka xubinta taranka dumarka?

Tijaabada baaritaanka xubinta taranka dumarka (horey waxaa loogu yeeri jiray baaritaanka Pap Smear Test) waxaa sameeya dhakhtar ama kalkaaliso caafimaad si loo hubiyocaafimaadka makaanka afkiisa loona baaro HPV.

Tijaabadu waa mid dhaqsi ah **oo ammaan ah**. Marmarka qaarkood waxay noqon kartaa wax aan la jecleysaneyn laakiin aan xanuun lahayn. Wax saameyn ah kuma yeelaneyso bikradnimada. Xubnahaaga jirka hoose waa la daboolayaa marka baaritaanka la sameynayo.

Waxaad awoodi kartaa:

- weydiiso **dhakhtar dumara ama kalkaaliso caafimaad**
- weydiiso **turjubaan**
- sii kaxeyso saaxiib ama qofka nolosha kaala dhaxeyso/ ninkaaga.

## Goorma ayaan u baahanahay inaan iska baaro?

Haddii aad 25 jir tahay ama ka weyn tahay oo aad waligaa xiriir galmo samaysay, ballan ka qabso dhakhtar ama kalkaaliso caafimaad.

Waa inaad **sameysaa Baaritaan joogto ah oo Afka ilmagaleenka ah shantii sano mar** ilaa aad ka gareyso 74. Xitaa haddii natiijada baaritaankaagii ugu dambeeyay uu fiicnaa, waa inaad heshaa xusuusin si aad u ballansatid baaritaankaaga xiga.

## Waa maxay tallaalka HPV?

Australia gudaheeda, waxaa ka jira talaal ka caawinaya dadka ka hortaga HPV.

Dhammaan ardayda, oo ay ku jiraan wiilasha, Sannadka 7aad waxay heli karaan tallaal HPV oo bilaash ah. Tallaalka waxaa loo bixiyaa laba qiyaasood oo ay u dhaxeyso 6-12 bilood. Haddii aad waalid tahay ama daryeele tahay, waxaad heli doontaa warqad aad ku saxiixeyso oo aad kusoo celin doontid dugsigaaga haddii aad jeclaan lahayd in ilmahaaga la tallaalo. Tallaalku wuxuu ka caawin doonaa ilmahaaga inuu ka badbaadiyo HPV goorta ay bilaabayaan galmada ama ay guursanayaan.

Haddii ilmahaagu seegay tallaalka dugsiga, weli way kuu heli karaan bilaash illaa 19 sano jir. Haddii aad jeclaan lahayd in lagu tallaalo adigoo qaangaar ah, weydii dhakhtarkaaga.

Haddii aad qaadatay tallaalka HPV waxaad weli u baahan tahay baaritaanka afka ilmo-galeenka laga bilaabo da'da 25, maadaama uusan tallaalku kaa ilaalinaynin dhammaan noocyada HPV.

Talaalkani waa badbaado, ma keeno kansarka mana abuuro dhibaato dhalmo caruur.

true
relationships & reproductive health

V1-20210513

# Tijaabada baaritaanka xubinta taranka dumarka waxay noqon karaan nolol badbaadin.

Boqolkiiba sideetan (80%) dumarka uu ku dhaco kansarka xubinta taranka dumarka waligood ma aysan soo marin baaritaanka xubinta taranka dumarka mana aysan sameynin baaritaan shantii sano ee la soo dhaafay.

DEGDEG iyo ammaan


Ku dadaal caafimaadkaaga

OO U WANAAJI QOYSKAAGA

## Sidee loo sameeyaa baaritaanka xubinta taranka dumarka?

### Tallaabada 1

Dhakhtarka ama kalkaalisada caafimaad ayaa galinaya **shey** xubinta taranka (siilka) haweenka Kadib waxay isticmaalayaan burush yar **oo jilicsan** si ay muunad uga qaataan unugyada / xab ka soo baxa makaanka afkiisa una diraan sheybaarka si loo baaro.




### Tallaabada 2

Markay natiijooyinka diyaar noqdaan, takhtarka ama kalkaalisada ayaa kula soo xiriiri doona. Haddii kale, lasoo xiriir rugta caafimaadka si aad u ogaato natiijadaada.

### Tallaabada 3

Haddii dhakhtarka ama kalkaalisadu ay ku weydiistaan inaad u timaado ballan si aad u hesho natiijooyinka, aad ayey muhiim u tahay inaad tagtid.

Waad soo qaadan kartaa saamigaaga haddii aadan waligaa soo marin baaritaanka afka ilmo-galeenka / xubinta taranka dumarka ama aad baaritaan martay waqti dheer ka hor. Haddii takhtarkaaga ama kalkaalisadaada caafimaadku oggolaadaan, waxay kuu sharixi doonaan sida.



Haweenka la guday ayaga laftigooda way weydiisan karaan baaritaanka.

ISI SOO BAAR
5 tii sanno mar.

Sida ugu fiican ee looga hortagi karo kansarka xubinta taranka dumarka waa inaad sameysaa **Tijaabada baaritaanka xubinta taranka dumarka 5 tii sanaba mar.**

## Halkee ayaad ka heli kartaa baaritaanka ilmo-galeenka ama xubinta taranka dumarka ee bilaashka ah?

- Rugta dhakhtarka (GP). Weydii inay "biilka dowlada ka qaataan" (lacag la'aan ay tahay)
- Xarumaha Caafimaadka Bulshada
- **Rug caafimaad ee True Clinic**- Brisbane, Ipswich, Toowoomba, Cairns iyo Rockhampton

**La xiriir True Clinic Brisbane**

07 3250 0200
clinicreception@true.org.au
**true.org.au/clinic**

Baaritaanka kansarka xubinta taranka dumarka waa muhiim

true relationships & reproductive health

V1-20210513